
# Xiriirka Qoyska – Dugsiga




Département de l'économie et de la formation
Departement für Volkswirtschaft und Bildung
CANTON DU VALAIS
KANTON WALLIS
SPVal
Société Pédagogique Valaisanne
AVECO
FRAPEVS



# Hordhac

## U Wadajiridda ladnaanta caruurta

Qoysaska waxey la wadaagayaan Dugsiga, ahdaafta aasaasiga ah ee barbaarinta iyo waxbaridda dhalinyarada. Sidaa darteed, iskaashigoodu waa inuu ahaadaa mid ku salaysan mabaadiida aasaasiga halbeegoodu la wada garanayo lana wada ixtiraamayo dhammaan. Hay'addaha waxbarashada waxaa marka hore lagu maamula Sharci-Dugsiedka ee 1962, kaas oo laga soo qaatay qoraallada sharci-dejinta. Kantonka ayaa qaabeeya, laakiin degmooyinku waxay leeyihiin madax-bannaani ballaaran. Macalimiinta naftoodu waxay haystaan xorriyad gaar ah oo ku saabsan hirgelinta waxbaridooda

Si loo iftiimiyo qaabeynta oo u muuqda mid adag iyo si loo qeexo xuquuqda iyo waajibaadka mid kasta, ururadda, la Fédération Romande des Associations de Parents d'Elèves du Valais (FRAPEV), Société Pédagogique Valaisanne (SPVal), l'Association Valaisanne des Enseignants des Cycles d'Orientation (AVECO)  iyo le Département de l'Économie et de la Formation (DEF), waxay jecelyihiin inay caddeeyaan mabaadi'da aasaasiga ah si dhammaan inta isukaashatay Dugsiga ay ugu noolaadaan si isla jaanqaad ah.

Qodobbada ku xusan buug-yarahaan ma beddelayaan qoraalladii hore loo dhaqan galiyay. Iyaga ayay tixraacayaan oo ay sugayaan, sidaas awgeed, hal qaabdhismeed guud oo qeexaya xiriirka ka dhexeeya qoysaska iyo Heyàda dugsiyeed. Maamulada Dugsiyada iyo macalimiintu waa inay macluumaad dhammaystiran siiyaan waalidiinta soo codsata. Tan kale, Maadaama ay yihiin qodobbo khaas ah, waxey ku tifaftiran yihiin oo laga heli karaa, mareegtada rasmiga ah ee Dowladda (https://www.vs.ch/web/se/ecole-famille).

Iyadoo lala kaashanayo xafiiska Adeegga Dadweynaha iyo Socdaalka, oo u xilsaaran is-dhexgalka soogalootiga, daabacaadan cusub waxaa sidoo kale lagu turjumay luqadaha bulshooyinka ajnabiga ah ee ugu muhiimsan ee ku sugan gobolkeena. Waxaa laga soo dejisan karaa mareegtada rasmiga ah ee kor lagu soo tilmaamay.

Aqoonta luqadda gobolka martida loo yahay waa shuruud lagama maarmaan ah si dhammaan waalidiinta ay u noqdaan kuwo si wacan u wada fahmay qaab howleedka Heyàdaha iyo si gaar ah Dugsiga

Waxaan sidoo kale rabnaa in aan ku adkeysano ahmiyadda Dalkeena siinaayo Mabdà Dugsiga Lacag La'anta ah, iyo sinnaanta gabdhaha iyo wiilasha(cf. Xeerka la xiriira Xuquuqda Cunuga, http://www.unicef.ch/fr/lunicef/international/convention-relative-aux-droits-de-lenfant) iyo baahida ilmaha oo ah in labada waalidba ay si firfircoon uga qayb qaataan fududeynta xiriirka Qoyska iyo Dugsiga.




## Dugsiga qasabka ah

Dugsiga qasabka ah wuxuu ka kooban yahay 11 sano (degrés HarmoS/H) oo loo habeeyey saddex wareeg: wareega 1 (1Jir ilaa 4 jir), wareega 2 (5 Jir ilaa 8 Jir) iyo wareega 3 (wareega Hagidda, 9-10-11 CO).

| Darajada Hoose – wareega 1 | | | | Darajada Hoose – wareega 2 | | | | Darajada Sare I – wareega 3 | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1H | 2H | 3H | 4H | 5H | 6H | 7H | 8H | 9CO | 10CO | 11CO |

## Dugsiga hoose

| | | |
|---|---|---|
| **Wareega 1** | 1H - 2H | Labada sano ee ugu horreeysa dugsiga (oo hore loogu yeeri jiray dugsiyada dhallaanka) waa qasab. Da'da gelitaanka waxaa lagu jaangooyay 4 sano jir ilaa bisha Julaay 31. Diiwaangelinta waa in ay waafaqsan tahay tilmaamaha Degmadaada.<br>Ardayda 1H iyo 2H waa isku fasal (fasal laba darajo ka kooban). Kuwa 1H waxa loo dhigaa nus gelin, oo ah 12 xilli min 45 daqiiqo, kuwa 2H, 24 xilli min 45 daqiiqo ah. U kala qeybinta waqtiyada fasalka ee usbuuca waa howsha masuuliyiinta goobta wayna kala duwanaan kartaa marka loo fiiriyo xaaladaha gaarka ah ee gobollada. Si kastaba ha ahaatee, waxaa caadi ahaan la oddorosaa 4- nus-gelin kuwa 1H iyo 8 kuwa 2H. Qaybinta nus-gelimaha way kala duwanaan karaan marka loo eego qaab-habeynta maxaliga ahi. |
| | 3H - 4H | Wakhtiga waxbaridda, oo ah 28 xilli min 45 daqiiqo, waxaa loo sameeyaa, ardayda, 8 nus-gelin. Qaybinta maalmaha nuska ahi way kala duwanaan kartaa waxay ku xiran tahay hay'adda maxaliga ahi. Qaybinta nus-gelimaha way kala duwanaan karaan marka loo eego qaab-habeynta maxaliga ahi. |




| | | |
|---|---|---|
| **Wareega 2** | 5H - 6H | Hal toddobaad dugsiyeed wuxuu ka kooban yahay 32 xilli min 45 daqiiqo ah. Si loo xoojiyo fasallo leh heerar kala duwan ama ardaydu ku badan tahay waxaa suurtagal ah in lagu shaqeeyo luqadda 2aad (Jarmal) hab- kooxeedyo kala gooni ah. |
| | 7H - 8H | Labada darajo ee ugu dambeeya waxay kaloo leeyihiin 32 xil-li. Si loo dhiirageliyo fasallo leh heerar kala duwan ama kuwa ardadu ku badan tahay, waxaa suurtagal ah in loo qey-biyo dhowr koox oo u kala baxsan sida luqadda 2aad ee (Jar-mal) iyo luqadda 3aad (Ingiriisi). |

**Saacadda maalmeedyada:**
Qaabeynta maalin dugsiyeedka ee si cutubyo saacadeed ah waxey ka imaa-neysaa isutashiga Degmada waxeyna tahay iskugu soo ururinta xilliyada waxbarasho, qaab cutubyo saacadeed ah. Waxey isku soo ururinayaan xil-liyada Waxbaridda, nus-gelinyo buuxa. Mabdà ahaan, bilawga iyo dham-maadka nus gelin walba waxaa la waafajinayaa dhammaan darajooyinka.
Tirada nus-gelinyada way kala duwanaan kartaa marka loo fiiriyo xaala-daha iyo baahiyada maxalliga ah. Marka la eego duruufaha saadka qaarkood (gaadiidka, UAPE, iwm.), degmooyinku waxay soo jeedin karaan qaabab kale oo abaabul ee toddobaadka ama maalinta.

## Wareega Hagidda(WH) /Cycle d'orientation (CO), hadda kadib soo gaabin CO.

Wareega Hagidda (CO) waxaa loo qaabeeyay illaa 3 sano. Waa marxalad u diyaarineyso qofka dhallinyarada ah doorashadiisa xirfadeed. CO ka dib, qofka dhalinyarada ah wuxuu aadayaa ama tababar xirfadeed ama wax-barasho. Hay'ad waxbarasho kastaa, waxay leedahay lataliye dhanka u hagidda xirfadaha.
CO waxay soo jeedinaysaa in ay isusoo ururiso ardayda, iyadoo loo eegayo natiijooyinkii ay dugsigooda ka heleen dhammaadka wareegga 2 (8H). Laga bilaabo 9 CO, duruusta waxaa loo bixiyaa heerka 1 ama 2 ee Faransiiska iyo xisaabta, ka dib, laga bilaabo 10 CO, sidoo kale sayniska iyo Jar-malka. Maadooyinka kale dhammaan, ardaydu waa la isku soo ururinayaa. Heerka 1 wuxuu bixiyaa duruus qoto dheer. Waxaa jirta suurtogalnimo loo-gu kala gudbi karo heerarka waxbarasho, waxayse ku xiran tahay dadaalka ardayga iyo horumarka uu ka sameyo dhanka waxbarashada.




# Qaab dhismeedka dugsiga kantonka Valais

**Mabaadi'da kale :**

- Hal macallim masu'ul ayaa loo magacaabayaa fasal kasto. Isagu waa mas'uulka ugu weyn ee ardayda iyo waalidiintooda ee fasalkiisa.
- Jadwalka saacadaha : Waa lasoo gaabsan karaa marka loo fiiriyo qorshaha daraasadda.
- Goobta dugsiyeenta waa goobta deegaanka.
- Daraasado ku wajahan caawinaad howlaha lagu fulinaayo guriga waxa qabanqaabinaya maamulka waxaana sameenaaya macalimiinta. Daraasadahaas waxaa la sameynayaa wakhti ka baxsan wakhtiga dugsiyeedka, waxaana loo jeedinayaa ardayda dhigata wareegyada 2 iyo 3 (eeg bogga 7 iyo 11).
- Dhexdhexaadiyeyaasha dugsigu waxay u shaqeeyaan sidii dad kaabayaal ah. Waxay gacan ka geysanayaan kor u qaadista jawiga wadajirka iyo ixtiraamka gudaha ee xarumaha waxbarasho. Waxay ballan qaadayaan tixgelinta inay xogta marna dibadda u bixin.

## Tababarada xiga




Xafiiska Hagidda Waxbarashada iyo Xirfadaha ayaa bartan kugu siinaya macluumaad dheeri ah. (www.vs.ch/orientation).




# Mashruuca guud ee tababaridda ardayga ee ku jirta, PER

Qorshaha waxbarasho ee roomaanka (Le plan d'études romand) marka lasoo gaabiyo ah (PER) wuxuu dejinayaa mashruuca guud tababaridda ee ardayga. Wuxuu tifaftirayaa, waxa laga rabo in ardaydu ay bartaan inta lagu guda-jiro waxbarashada khasabka ah iyo heerarka laga rabo in ay gaaraan dhamaadka wareeg kasta (dhammaadka sannadka 4aad, 8 aad iyo 11 aad).


Qorshahan waxbarasho wuxuu tirakoobayaa wadarta aqoonta iyo xirfadaha taas oo horumarka laga filayo in ay ka gaaraan dhammaan ardayda ku jirta waxbarashada khasabka ah, wadartaa oo loo kala dhigay saddex siyood:

Tabaha isweydaarsiga (Wadashaqeynta, Isgaarsiinta, Xeeladaha Waxbarashada, Fekerka Hal-abuurka, Habka baaraandegidda).

Tababarka guud (MITIC, Caafimaadka iyo ladnaanta, Dooqa iyo mashaariic shaqsiyeedka, Wada noolaanshaha iyo ku dhaqanka dimuqraadiyadda, Isku-xirnaanshaha);

Maadooyinka (Luqadaha, Xisaabta & Sayniska Dabiiciga ah, Sayniska Aadanaha iyo Bulshada, Farshaxanka, Jirka & Dhaqdhaqaaqa);

**http://www.plandetudes.ch**




Si loo fududeeyo fahamka PER, FRAPEV waxay si joogto ah u qaybisaa buug-yare oo loogu talagalay waalidiinta ardayda dhigata waxbarashada khasabka ah. Sidoo kale, Tarjumooyin waxaa laga heli karaa, barta internetka : https://www.vs.ch/web/se/ecole-enfantine-primaire-et-co.




Mar hadii ay baaris xanuun-qabka cadeysay heyàd takhassus u leh, islamarkaana waaxda waxbarashada aqoonsan tahay, ardayda qabta cillad halis ah ama naafonimada kala duwan ( dhib-aqrinta, dhib-qoridda, dhib-xisaabinta, dhib-falsameynta, mashaakil HPI, iwm) waxay ka faa'iidaysan karaan xaalado gaar ah (kaalmo buuxineysa dib u dhacyadooda) dhinaca waxbariddoda iyo ka gudbida imtixaanada. Xil iska saaridda ardayda leh baahiyo gaar ah, waxaa loo habeeyay, marka loo baahdo, si waafaqsan, nidaam u suurta gelinaayo helitaan xal ku haboon xaalad kasta, si, gaar ahaaneed :

## Daraasado la kormeero

( laga bilaabo 5 H ilaa 11 CO)
Degmooyinku waxay qabanqaabin karaan daraasado la kormeerayo, oo ka baxsan wakhtiyada la fadhiyo fasalka. Duruustani waxay u oggolaanayaan ardaygu inuu si madax-bannaan u guto dhammaan ama qayb ka mid ah leyli-guriyeedka.
Haddii dhammaan Degmooyinka aanay bixinin duruustan, heerka dugsiga hoose, waxey guud ahaan ku habaysan yihiin qaab CO ah.

## Daraasado la hago

(laga bilaabo 5 H ilaa iyo 11 CO)
Daraasadaha la hago waxaa loo fidiyaa ardayda qabo baahi caawinaad gaarah si uu u fuliyo leyli-guriyeedka, gaar ahaan, marka loo eego is abaabulkiisa ama xeeladahiisa waxbarasho. Tallaabadan waxaa loo agaasimay si ka baxsan wakhtiga fasalka, wakhtigeedane waa uu kooban yahay. Mabda 'ahaan, ma u suurta gelineyso ardayga in uu fuliyo idil ahaan leyli-guriyeddadiisa.

## Taageerada barbaarineed ee ka baxsan wakhtiga fasalka

(laga bilaabo 9 CO ilaa 11 CO)
Ardeyga kala kulma dhibaatooyin aan joogto ahayn hal maado ama ka badan heerkiisa, ama leh ujeedo la gaari karo ee u gudbida heer ka kore waxuu ka faa'iideysan karaa taageero barbaarineed oo ka baxsan wakhtiyada fasalka, iyada oo ujeedadu tahay in lagu caawiyo in uu buuxiyo nusqaanka dugsiyeentiisa.

## Taageerada barbaarinta ee ardayda allophone-ka (waa arday luqad kale ku hadla)

(Mabd'a ahaan laga bilaabo 3H ilaa 11 CO)
Taageerida barbaarineed ee loogu talo galay ardayda aan aqoonin luqadda dadka martida loo yahay, waxaa loogu habeeyay xilliga fasalka lagu jiro, qaab duruus ah kuwaas oo ujeeddadoodu tahay in la horumariyo xirfadaha xiriir-bulsheedka ardayga. Tani waxay u suurta gelineysaa inuu sida ugu dhaqsaha badan ula socdo waxbaridda ku baxeyso luqadda dadka martida loo yahay. Taageeriddaan wehlinta ah, maka badnaaneyso, mabdà ahaan, 2 sano.
Ardayga waxa laga dhaafikaraa qiimeynta maaddooyinka ay aqoonta Faransiisku saamayn ku leedahay.



# Ardeyda dhibeysan

## Taageerada barbaarineed ee milman

(Mabdà ahaan laga bilaabo 3H ilaa 11 CO, marka laga reebo CO loo habeeyey fasalo hubin ah)

Xoojinta barbaarineed ee milman waa tab waxbarid gaar ah, oo muddo xaddidan, loogu talagalay in lagu caawiyo carruurta qabta baahiya gaar ah. Macallin takhasus leh ayaa sugayo xil iska saarida ardayda dhibeysan, fasalka dhexdiisa ama meel gaar ah, saacadaha fasalka lagu jiro. Wuxuu si dhow ula shaqeenayaa maclin masuulka, waalidiinta iyo hawl-wadeenada ka imaanayo dugsiga dibaddiisa. Qiimeynta joogtada ah waxey suurta gal ka dhigayaan in la cabbiro horumarka la gaaray iyo in la waafajiyo xil iska saaridda baahiyooyinka caruurka.

## Barnaamijka iswaafajinta

(laga bilaabo 4 H ilaa 11 CO)

Barnaamijka iswaafajinta wuxuu quseeyaa ardayda oo, hal maado ama in ka badan, la socon kari là, ayada oo aan si gaar ah loo waafajinin ujeeddooyinka muhiimka ah ee barnaamijyada socda.

Dejinta barnaamij la jaan qaad leh, waxay ku xiran tahay aqbalidda waalidiinta iyo oggolaanshaha kormeeraha dugsiga.

Qaar ka mid ah CO, ardayda ku jirta barnaamijka la jaan qaadka waxaa la isugu geeyay fasallada hubsiimada.

## Ku noqoshada

Ku noqoshada waa tallabo ay khuseyso ardayda ku guul darreysta fasalka, taas oo ah, in ayan gaarin ujeedooyinka loo cayimay barnaamijka (celceliska kooxda 1aad ama celceliska guud oo ka hooseeya qiimaha 4). Taasi waxay tahay dib u sameynta sanadka barnaamijka waxbarasho ee wareegyada 2 iyo 3. Ku noqoshada 2H ama 3H waa suurtagal xaalado dhif aan caadi ahayn.

## Hayàdaha kale ee isxilqaanka ah.

Xafiiska Waxbaridda Khaaska (XWK) waxay u idmantahay in ay u sheegto qoysaska heyàdaha kale ee u xilsaaran carruurta dhibeysan ama ku sugan xaalad naafo ah: fasallo khaas ah, xoojinta barbaarinta la adkeeyay, fasallo hordhac tababareed, dugsiyo khaas ah, dugsiyayn goobo isbitaal ah.

## Le guichet unique (Barta kantoonku ku leeyahay internetka)

Dhammaan codsiyada caawinaad (waxbarid khaas ah, hagaajinta hadalka, dhaqdhaqaaqa, cilmi nafsiga ama taageerada hab-dhaqanka) waa in loo gudbiyaa maamulka dugsiga iyada oo loo marayo macalinka, oo idin siin doona foomka iyo macluumaadka muhiim ah. ka dib codsigan waxaa isla qaadaal-dhigaya dugsiga iyo khubaro ku kulmaayo kalfadhi iskuduwid. Kadib go'aanka waxaa lala socodsiinayaa waalidiinta.

Barta http://www.vs.ch/web/oes ayaa idin siin doona macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan codsiga taageerada ardayda.





# Waajibaadka waalidiinta

## Waalidiinta :

- Waa in ay la shaqeeyaan heyàdda dugsiyeedka iyo in ay ixtiraamaan macalimiinta iyo shaqadooda iyo sidoo kale xeerarka Dugsiga,
- Waa in ay la xiriiraan qofka xilka haya haddii khilaaf yimaado si ay uga wada hadlaan xaaladda ama loo qaban qaabiyo kulan wada hadal. Sida ay tahay xaaladda iyo nooca mushkiladda, maamulka, iyo xitaa kormeere dugsiyeedka, waa lagu wargelin doonaa.
- Waa in ay mas’uuliyad iska saaraan ah in ilmahoodu ku yimaado dugsiga xaalad wanaagsan ee waxbarasho (nadaafad, hufnaanta, hurdo),
- Waa in ay daneeyaan hab-dhaqankiisa iyo shaqadiisa fasalka iyo isku taxalluujiyaan gurigane, si kalgaceel ah.
- Waa in ay yimaadaan wadahadallada ay macalimiinta/maamulka dugsigu ay ugu yeeraan. Haddii loo baahdo, joogitaanka turjumaan/tebin-tarjume jaaliyadeed waa loo dalbayaa,
- Waa in ay qaataan macluumaadka uu dugsigu siiyo, uguna marqaati yeelaan, haddii la weydiisto saxiixooda. Intaa waxaa dheer, inay xog weydiisan karaan marka loo baahdo.
- Waxay masuul ka yihiin ilmahooda jid mareenka iyo barxadda dugsiga, wixii ka baxsan saacadaha dugsiyeedka (Ammaankooda, hab-dhaqanka, telefoonada gacanta, iwm.),
- Waa inay la socodsiiyaan macalimiinta, wixii mashaakil caafimaad ah ee ku yimaado ilamahooda tas oo muhiim u ah iska xil saaridiisa,
- Waa inay geliyaan ilmahooda ceymis dhanka khatarta, jirrada iyo shilalka. Sidaa darted ma jiro caymis wadareed dugsigu leeyahay. Marka uu shil dhaco, waalidiintu waxay si toos ah ula xiriirayaan shirkadahooda caymiska.
- Waxaa waajib ku ah in ay dugsiga u sheegaan dhammaan maqnaansho iyo cudurdaaradooda.
- Waxaa laga codsanayaa inay si adag ugu hoggaansamaan qorshaha dugsiyeeynta. Marka ay dhacdo khiyaameen, kormeeraha dugsigu wuxuu soo rogi karaa ganaaxyo.
- Waxay mas’uul ka yihiin fasaxyadda ay dalbanayaan caruurtooda iyagoo dusha saaranaaya mas’uuliyadda la socodka barnaamijyada ayagoo la kaashanaya macallimiinta,
- Waxaa loogu yeeri karaa ka qaybgalka maaliyadeed ee dibad-socod dugsiyeedka ikhtiyaariga ah,
- Waa in ay guuritaanka sida ugu dhaqsaha badan u wargeliyaan maamul dugsiyeedka.
- Waa in ay ka dhawrsadaan isticmaalka baraha bulshada si ay u xalliyaan mashaakilaadka dugsiyeedka, ayna ka door-bidaan wadahadal ay la yeeshaan macalinka.

Waalidka aan lahayn awooda waalidnimo waa la ogeysiin doonaa dhacdooyinka gaarka ah ee ku yimaada nolol dugsiyeedka ilmaha, waana la dhageysan doonaa ka hor inta aan la qaadanin go’aamo muhiim u ah horumarka ilmaha. Wuxuu ka soo qaadan karaa dhinacyada saddexaad ee kaqeybgalaya xil iska saaridda ilmaha, macluumaad ku saabsan xaaladdiisa horumarineed




## Mas’uuliyadda ardayda

**Ardayda, iyagoo kaashanaya waalidkood iyo macalimiintooda:**

- Waa in ay ixtiraamaan xeerarka dugsiga, macalimiinta, dadka ka shaqeeya rugta waxbarasho iyo asxaabtooda iyo sidoo kale dhammaan waxa loogu deeqay (goobta, alaabta fasalka, qalab-waxbarasho),
- Waa in ay qaataan labbis nadiif ah oo hufan oo lagu qeexay Xeerka Dugsiga,
- Waa in ay Isku hawlaan, iskuna taxallujiyaan qaadashada doorkooda ardaynimo, iyo sidoo kale waxbarashadooda bulshonimo,
- Waa ka mamnuuc Isticmaalka qalabka elegtarooniga ah ee si gaar ah loogu isticmaalo gudaha wareega dugsiga. Meelaha ka baxsan wareegga dugsiga, ardaydu waxay la imaanayaan isticmaal habboon iyo ixtiraam ardayda ay isku fasalka yihiin iyo shaqaalaha dugsiga, siiba isticmaalka shabakadaha bulshada (da’da ugu yar waa inta u dhaxaysa 13 iyo 16 sano, kuna xiran shabakadda la isticmaalayo),
- Waxay mutaysan karaan ciqaabyo marka ayan dhowrin xeerarka.

## Waajibaadka dugsiga iyo macalimiinta

**Dugsiga :**

- Wuxuu xilsaarayaa inuu u fududeeyo iyo iskutaxallujinta ardayda goobta dugsiyeenta iyo in uu u oggolaado xaqa dhiibashada aragtidooda iyo in la dhageysto.

**Macalimiinta :**

- Waxay isku xilsaarayaan garabsiinta waalidiinta howlahooda barbaarin iyo waxbarid, ayaga oo ixtiraamaayo ardayga iyo waalidiintiisa iyadoo taxadiraayo caddaalad iyo eex-la’aan.
- Waxay gacan ka geysanayaan is-dhexgalka ubadka iyo fasalka la qabsigiisa,
- Waa in ay ku wargeliyaan dhammaan waalidiinta jaan qaad dugsiyeedka ilmahooda, ugu sharaxaada ujeedooyinka waxbarasho isu imaadka wadajirka ah iyo kulanada gaarka ah. Haddii loo baahdo, joogitaanka turjumaan/tebin-tarjume jaaliyadeed waa loo dalbayaa,
- Waa in ay si joogto ah ula socodsiiyaan natiijooyinka laga helo galka qiimaynta, buug-yara dugsiyeedka iyo ururiyeyaasha qiimaynta iyo la socodsiinta waalidiinta howlaha dhaqanka, ciyaaraha, kobcinta nafta iyo kuwa ka hortagga,
- Macalimiinta wey dhagaysanayaan waalidiinta, wey ku dadaalayaan joogteynta wada hadalka iyo, ballamid kadib, ka jawaabayaan codsiyada waalidiinta,
- Waxay mas’uul ka yihiin anshaxa fasalkooda iyo faragelinayaan, haddii loo baahdo, wareeg dugsiyeedka, sidoo kale ardayda rugta waxbarasho dhexdeeda. Haddii dan qasabto, waxay ku dhawaaqaan ciqaab edbino ku qoran xeerka,
- Waxay mas’uul ka yihiin dhaqdhaqaaqyada iyo howlaha saacadaha dugsiyeedka. Waalidiinta waxey mas’uul ka yihiin dhaqdhaqaaqyada shaqsiyeed ee carruurta (xaalad gaar ah, booqasho caafimaad, iwm.).





## Hawlaha guriga

- Hawlaha guriga, oo noqon kara leyli-guri iyo casharro, ku aadan horumarinta iskufilnaanshada ardayga iyada oo la xoojinayo aqoonta uu ku bartay dugsiga iyo joogteynta xiriirka iyo iskaashiga qoysaska.
- Si mug leh oo dheeli tiran, waa in hawlaha loo kala soocaa ayada oo lagu qotaminaayo da'da ardayda iyo fulinteeda si madaxbannaan.
- Doorka qoysasku waxa uu ka kooban yahay abuurista iyo ku ilaalinta qaab-barasho u oggolaanaya ubadku in uu guto leyliyadiisa guriga, ay muujiyaan danayn hawlihiisa iyo hubinta in shaqadiisa uu qabtay, iyaga oo aan si joogto ah u saxin. Waalidiinta waxay u tilmaamayaan macalinka dhibaatooyinka waaweyn ee ay ku arkeen (muddada, tirada, dhibka, iwm.).
- Marka la eego talooyinka macalinka iyo mas'uulka iyo agaasimaha, daraasado la hagayo ayaa loo abaabuli karaa si loo daboolo baahiyaha la xaqiijiyay.

## Hab-maareen haddii khilaaf yimaado


- Wadahadalku waa in had iyo jeer uu lahaado mudnaanta.
- Qofka ugu horeeya ee ay la hadlayaan waalidiintu waa macalinka ay khuseyso ama macalinka mas'uulka ah. Agaasimaha iyo kormeeraha ayaa marka xigta la dalban-karaa.
- Dhammaan dhibaatooyinka ka dhasha qab-dugsiyeedka ee ay u dhaxayso ardayda, waalidiinta, dadka ardayda masuulka ka ah ama dhinacyada saddexaad iyo shaqaalaha waxbarida waxaa kala saaraya maamulka, iyada oo ku xidhan kasoo horjeedid go'an oo loo gudbiyo kormeere dugsiyeedka.






## Caafimaadka dugsiyeed

Iyadoo loo marayo hab jaaliyadadeed, hadafka caafimaadka dugsiyeedka waa in la xaqiijiyo horumarinta, ka hortagga iyo ilaalinta caafimaadka ardayga.




Kalkaalisadu waxey xajjineysaa xiriirka ka dhexeeya dugsiga iyo waalidiinta Marka ay timaado dhibaatooyin la xiriira caafimaadka ilmaha iyo dhalinyarada.
Waalidiinta iyo macalimiintu way ka dalban karaan talooyin iyo macluumaad.

Wixii macluumaad dheeri ah: https://www.promotionsantevalais.ch/fr/sante-scolaire-460.html

## Isusocodyada jid-mareenka dugsiga

Isusocyada jid-mareenka dugsiga waxey hoos imaaneysaa mas'uuliyadda waalidiinta. Socdaalka lugta ah ayaa la door bidayaa. Amniga, caafimaadka iyo dhaqdhaqaaqa waa in la ixtiraamaa lana qiimeeyaa waqti kasta.

Pedibus waa bas beddel aad u muhiim ah socdaalka wadajirka ah uu hoggaaminaayo qof weyn. Ayada oo ay ku xirantahay helitaankiisa iyo dhaqaalaha, Pédibus kasta wuxuu gooshaa inta asiga dan ugu jirto. (sii socod /soo noqosho, sii socod kaliya, dhawr maalmood todobaadkii, iwm…).

Wixii macluumaad dheeri ah: valais@pedibus.ch ama 076 690 51 68.





Baaskiilka ama laba-lugley caruureedka waa in ay munaasab ku yihiin dherka caruurta iyo in ay haystaan qalabka ku habboon. Adeegsigoodu waa in ay u hoggaansamaan xeerarka waddo ku socodka iyo tan booliiska ( qaadashada koofid-difaac ah waa muhiim).

Marka ay jiraan hawlo qaarkooda oo gaar ah, macalinka ama waalidiinta waxay ku qaadi karaan ardayda baabuuro shakhsiyeedka haddii dadka saaran ay ku jiraan ceymis dhanka shilalka iyo in xeerarka khuseeya wado ku socodka la ixtiraamo : ku xakameynta carruurta suun-celiye ku habboon, tirada carruurta la qaadaayo waa in aysan ka badnayn tirada kuraasta loo oggolyahay ogolaanshaha wado-ku-maridda, iwm.

Degmooyinku waxay soo saari karaan awaamiir ka sii xaddidan. Waa in la tixraacaa.


## Xarumaha soo dhoweynta

Soo dhoweyn maalmeedka ee qoyska ka baxsan waxay u suurta gelinayaan waalidiinta inay isku wadaan shaqada iyo hawlaha qoyska waxayna siinayaan carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa dhammaadka dugsiyeenta hoose, suurtagalnimada ku soo dhaweeytooda wadajir ahaan xarumo maalmeedyo u horseedaayo korriin wanaagsan iyo taageeridda ilmaha dhanka waxbarashadiisa ama la doorbidinaayo qaab qoysnimo ku qaabilidda ee waalidiinta soo dhoweynta maalmeeyada.
Noocyada kala duwan ee xarumaha soo dhoweynta waa kuwa soo socoda :

- Xannaanada: laga bilaabo dhalashada ilaa 18 bilood, waxey furan tahay maalinta oo dhan la jirto nafaqeyn.
- Xannaano-maalmeed: min 18 bilood ilaa 6 jir, waxey furan tahay, maalintoo dhan, la jirto cunteen.
- Xarun ilaalin: min 18 bilood ilaa 6 jir, waxay furan tahay nus-maalin cunto la’aan
- Xarun soo dhaweynta ee arday-dugsiyeedka (XDAD): min 4 sano jir ilaa dhamaadka dugsiyeenta hoose, waxay furan tahay waqtiga dugsiyeenta ka baxsan lana jirto cunteen.
- Xanaanada caruurta: min 3 jir ilaa 6 sano jir, waxay furan tahay nus-maalin cunto la’aan
- Ilaalin-gaaban: min 2 ilaa 8 jir, waxay furan tahay nus-maalin, xajis-la’aan dhowr saacadood waana cunto la’aan

Xarumaha ay degmooyinka sameeyaan waxay ku xiran yihiin ogolaanshaha iyo kormeerka gobolka.

# Baro-xiriireed oo waxtar leh



Ururuda Roomaand ee Waalidiinta Ardayda wax kadhigata Gobolka Valais (FRAPEV)
www.frapev.ch

Bulshadda Waxbarasho ee ku dhaqan Gobolka Valais (SPVal)
www.spval.ch

Ururka Macalimiinta Wareega Hanuuninta CO (AVECO)
www.aveco.ch

Waaxda Waxbarashadda
www.vs.ch/web/se

Xafiiska Waxbarashadda Gaarka ah
http://www.vs.ch/web/oes

Xarunta Warfaafinta-Isgaarsiinta-Teknolojiyadda
https://www.ictvs.ch/

Qorsho Waxbarasho loo bandhigay Waalidiinta Roomaandka
https://www.vs.ch/web/se/ecole-enfantine-primaire-et-co

Qorshaha Waxbarashadda ee Romaandka
http://www.plandetudes.ch

Hagitaanka Waxbarashadda iyo Xirfadaha
www.vs.ch/orientation

Adeegga Dhalinyaradda ee Kantonka
www.vs.ch/web/scj

Mashruuca Waxbarashadu waa awood-siin
www.vs.ch/web/scj/edf

Caafimaadka Dugsiga
https://www.promotionsantevalais.ch/fr/sante-scolaire-460.html

Xarumaha Soodhoweynta
https://www.vs.ch/web/scj/secteur-d-accueil-a-la-journee

Isusocodyadda jid-mareenka dugsiga
https://pedibus.ch/coordinations/pedibus-valais/

Buug-yaraha Xiriirka Qoyska-Dugsiga
https://www.vs.ch/web/se/ecole-famille

Wixii macluumaad intaa dheer mid gaar ah iyo mid deegaan, la xiriir maamulka dugsiga ama tixraac website-ka dugsiga, iyo sidoo kale ajandaha dugsiga.

# Notes

# Waxbaridda, waa

...Jaceyl fara-badan

...Aqbalidda qilaafaadka

...Garashada sida wax loo dhegeysto

...Xad u yeelidda

...U horseedid Madaxbannaanida

...Muujinta dareenka

...Degannaan

...Dhiiragelin



www.vs.ch/web/scj/edf

KANTON WALLIS

**WAXBARASHADA**
**WAXAY KUSIISAA**
**AWOOD**